



MARKAAD GUUREYSO IYO BIILASHA TAMARTA

National Energy Action waa hay'ad samafal oo ka howl-gasha guud ahaan dalka, waxayna kaa caawinaysa biilasha tamarta sida korontada iyo gaaska. Buug-yarahaan wuxuu ku siinayaa talo ku aadan waxyaalaha aad sameyn karto markii aad meel ka guureyso ama aad dageyso si aad u xaqiijiso in shirkadda tamarta ama korontada aysan deyn kugu yeelan.



MARKAAD MEEL SOO DAGEYSO

OGOOW SHIRKADDA TAMARTA EE HADDA KU JIRTA GURIGA

Qofka kaa kireeyay guriga ayaa kuu sheegi kara. Sidoo kale waxaad:

KA BAARI KARTAA POSTCODE-KAAGA halkan

www.findmysupplier.energy.

KALA XIRIIR QOLYAHA CAAWIMAADA EE NAMBARKA SAACADA:

taleefanka **0870 608 1524**, Isniin ilaa Jimce, 8:30am ilaa 5pm.

Wicitaannada waxay ku kacaan 7p daqiiqadii, iyo lacagta shirkadda taleefankaaga.

WAXAAD WEYDII SAN KARTAA NAMBARKA TIXRAACA SAACADA (MPRN). Waxaad u baahan kartaa nambarkan markii aad iska diiwaan gelineyso shirkad cusub oo gaaska ah.

QASAB MA AHAN IN AY KUUGU JIRTO SHIRKADAAN

Waxaad xaq u leedahay inaad doorato shirkadii aad rabto.

HADII AAD RABTO IN AY KUUGU SII JIRTO ISLA SHIRKADAAN,

la xiriir iyaga oo u sheeg macluumaadkaaga si ay kuu diiwaangeliyaan.

Sii macluumaadka ku qoran saacada markii aad bilowday isticmaalida tamarta. Tani waxay xaqijineysaa inaad bixin lacag aadan isticmaalin.

HADII AADAN RABIN IN AY KUUGU SII JIRTO SHIRKADDA HADDA, wac shirkadda aad rabto oo isaga diiwaangeli macamiil cusub ahaan.

ISKA FIIRI OO AKHRI SAACADA

Xitaa haddii aadan isla markaasba soo degaynin, iska fiiri saacada markii horay lagaa siiyo furaha. Haddii ay suurtoagal tahay, sawir ka qaado cadeyn ahaan.

SAACADAHA HORMARISKA LOO BIXIYO LACAGTOODA



LA XIRIIR SHIRKADDA si aad u ogaato

haddii saacada lagu leeyahay deyn hore.

Haddii ay jirto, codso in laga tirtiro,

maadaama deynta lagu leeyahay kuwii horreeyay.

WEYDII SHIRKADDA inay ku siiyaan

kaarar/furayaal cusub ee lacag hormariska

ah si aad lacag ugu shubato.

HADII AYSAN LACAG KU JIRIN SAACADA,

iska ilaa inaad lacag ku shubto kaarar/fureyaal

laga yaabo inay kaga tageen dadkii hore. Marka

hore wac shirkadda. Haddii aad u baahantahay

inaad isticmaasho kaararkan, u sheeg shirkadda

arintaan si ay u ogaadaan haddii wax dayn ah

laga jarayo.

SAACADAHA LACAG HORMARISKA AAN AHEYN

Markaad la xiriirto shirkadda si

aad xogtaada u

diiwaangeliso, waxaa laga yaabaa in laguugu xisaabiyo qiimaha caadiga ah.

Waad weydiin kartaa iyaga haddii ay bixiyaan qiimo jaban, waana inay ku sheegaan.

Waxaad dooran kartaa inaad bixiso lacagta adigoo isticmaalaya debit toos ah, ama kaash/jeeg marka lagu soo diro rasiidka.

SAACADAHA CASRIGA AH

OGOLAANSHO MIYAAN UGA BAAHANAHAY MILKIILAHA GURIGA HADII AAN RABO SAACAD CASRI AH?

Haddii biilka tamarta uu ku qoran yahay magacaaga, ikhtiyaar ayaad u leedahay inaad rakibato saacad casri ah.

Laakiin waa inaad u sheegtaa milkiilaha guriga inta aadan badalin. Haddii aad taageero u baahato, waxaad qadka ka heli kartaa foom tusaaleedyo aad isticmaali karto si aad u wargeliso milkiilaha guriga.

www.smartenergygb.org/about-smart-meters/smart-meters-renters

Haddii warqada heshiiskiina ay sheegeyso inaad ogolaansho uga baahan tahay mulkiilaha, Ofgem, oo ah hey'adda dowlada u qaabilsan maamulka tamarta, ayaa sheegeysa inaysan kaa hor istaagi karin.

BIYAHA



ISKA FIIRI OO AKHRI SAACADA (Hadii ay ku jirto guriga).



OGOOW SHIRKADDA BIYAHA EE KU JIRTA GURIGA.

Waxaad ka ogaan kartaa halkan – www.water.org.uk/customers/find-your-supplier



LA XIRIIR SHIRKADDA BIYAHA EE AY KHUSEYSO OO ISKA DIIWAANGELI.

Waxay ku weydiin doonaan magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka iyo inaad u sheegto habka lacag bixinta.



U SHEEG XAALADAADA DHAQAALE, Hadii aad

caruur heysato, ama aad qaadato gunooyin, iyo hadii aad biyo badan isticmaasho sababo caafimaad aawgeed. Tani waxay ka caawineysaa shirkadda inay xaqiijiso in laguugu xisaabiyo qiimaha kugu habboon oo aad hesho qiima-dhimis kasta oo aad istaahisho.

MARKAAD MEEL KA GUUREYSO

KORONTADA, GAASKA IYO BIYAHA



Fiiri saacada waxa ay sheegeyso maalinta aad guureyso ama guriga aad iibineyso (sawir ka qaad hadii aad awoodo).



Isla markiiba la xiriir shirkadaha adeegyadaas bixiya. U sheeg inaad guureyso oo la wadaag inta ay saacada sheegeyso. Waxay kuu soo diri karaan biilkii xiritaanka si aadan u bixin lacag koronto, gaas ama biyo aadan isticmaalin. Hubi haddii ay jirto lacag aad horay u bixisay oo aadan wali isticmaalin.



La wadaag shirkadda ciwaanka cusub si ay kuugu soo diraan biilkii ugu dambeeyay.

MACLUUMAAD MUHIIM AH

Aad ayey muhiim u tahay in shirkadda tamarta iyo biyaha iyo sidoo kale Shirkadda Maamusha Korontada (DNO) ay ogaadaan haddii aad ku jirto xaalad nuglaansho ah ama aad qabto xaalad caafimaad, si lagu diiwaangeliyo Diiwaanka Adeegyada Dadka Mudnaanta leh. Faahfaahinta DNO-gaaga waxaad ka heli kartaa warqada biilka tamarta ama halkaan: <https://www.energynetworks.org/customers/find-my-network-operator>.

Si aad u ogaato hadii laguugu dari karo barnaamijka Diiwaanka Adeegyada Dadka Mudnaanta leh, booqo www.thepsr.co.uk ama wac **020 7066 1000**.

Waad istaahishaa in laguugu Diiwaanka Adeegyada Dadka Mudnaanta leh haddii aad:

- Gaartay da'da hawlgabka
- Heysato ilmo ay da'diisa ka yartahay shan sano
- Qabto cudur raaga ama aad naafo tahay
- Isticmaasho qalab caafimaad oo ku shaqeeya koronto ama biyo
- Haddii ay dhawaan kusoo wajahday xaalad adag, sida geeri ku timid xubin kamid ah qoyskaaga, ay shaqo la'aan kugu dhacday, ama dhakhligaaga uu hoos u dhacay.



**HADII AAD WALI KU DHIBANTAHAY
ARINTAAN, KA WAC QEYBTA ADEEGGA
TALO-BIXINTA IYO CAWIMAADDA EE NATIONAL
ENERGY ACTION TALEEFANKA 0800 304 7159
AMA BOOQO WWW.NEA.ORG.UK/GET-HELP.**

Waxaad u turjumi kartaa warqadaha wacyigelinta iyo websaydka National Energy Action in ka badan 160 luuqadood – sidoo kale waxaad ku heli kartaa adeega cod u-badalidda qoraalka in ka badan 100 luuqadood.

Sidoo kale waxaad qoraalka u habeyn kartaa qaab ay kula jaan qaadi karaan dadyowga qaba baahiyaha gaarka ah ee garaadka sida ADHD iyo dhaaylegsiya, iyo dadka aragtidooda ay daciifka tahay.

Guji Badhankeena Recite me adigoo [booqanaayo barteena www.nea.org.uk](http://www.nea.org.uk)

National Energy Action waa hay'ad samafal oo UK ka howlgasha oo u heellan la-dagaalanka saboolnimada tamarta, waxayna ka shaqeysa sidii uu qof kasta ugu noolaan lahaa guri diiran oo amaan ah.

Booqo www.nea.org.uk.

© National Energy Action Abriil 2025, nambarka diiwaangelinta hey'adda: 290511. Hey'ad aan saamiley laheyn, faa'iido doona ahayn. Ka diiwaangashan Ingiriiska iyo Welis, Nambor: 01853927.